# Xeerka NY HERO

## Xeerka Xuquuqda Aasaasiga ah iyo Caafimaadka ee NY

### Waa maxay Xeerka NY HERO?

- Xeerka Caafimaadka iyo Xuquuqda Aasaasiga ah ee New York waxaa si sharci ah loo saxiixay taariikhdu markay ahayd 5ta bisha Maajo, 2021.
- Sharcigu wuxuu bixinayaa amrarro cusub oo lagu ilaalinayo caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, iyada oo looga falcelinayo safmareenka COVID-19, si looga ilaaliyo shaqaalaha u feydsanka iyo cudurka inta lagu jiro dillaaca cudurka hawada raaca ee la isqabadsiiyo.
- Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha Gobolka New York (DOL) ayaa abuurtay Qorshayaal Ka-Hortagga U Feydmiga Cudurrada Caabuqa Hawada Raaca oo Tusaale Ah iyo Qorshayaal Tusaale u ah meheradaha kala duwanna u gaarka-ah. Loo-shaqeeyayaashu waa inay ka qaataan Qorshe Tusaalaha u habboon Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha (DOL), ama abuurtaan qorshe kale oo ka sarreeya heerarka ugu yaraanta laga rabo.
- Markuu Gobolka New York uu u aqoonsado cudur hawada raaca inuu u yahay khatar halis ah caafimaadka, loo shaqeeyayaasha ayaa looga baahan yahay inay fuliyaan qorsheyaashooda.

### Yaa ku tacalluqaa?

- Xeerka NY Hero Act wuxuu ku tacaluqaa dhammaan shaqaalaha ganacsiga gaarka loo leeyahay iyadoon loo eegin xaaladdooda socdaal (immigration).
- Tan waxaa ku jira shaqaale waqti-dhiman shaqeeya (part-time), qandaraaslayaasha madax-bannaan, shaqaale guri, daryeel guri iyo shaqaale daryeel shakhsi, shaqaale maalinle ah, shaqaale beeraleey ah, iyo shaqaale kale oo ku meel gaar ah iyo kuwa xilliyeed.





### Yaanan ku jirin?

- Xeerka NY HERO Act ma qabanayo ama ku ma jiraan shaqaalaha ama qandaraaslayaasha madaxa bannaan ee dawladda, qayb-hoosaad kasta oo siyaasadeed ee dawladda, hay'ad dadweyne, ama hay'ad kale oo dawladeed.
- Loo-shaqeeyayaasha goobaha daryeelka caafimaadka kuma jiraan xeerkan HERO haddii loo shaqeeyaha yahay mid ku meel gaar ama heer joogto ah oo uu qaatay Maamulka Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada.
- Loo-shaqeeye kastaa waa inuu go'aamiyaa haddii shaqaalihiisa ay ku jiraan iyo in kale, ama mid ka mid ah shaqaalihiisa, uu qabanayo xeerka OSHA ee ku meel gaarka ah ama joogtada ah.
- Haddii heerka OSHA ee ku meel gaarka ah la howl gelin karin, markaa kan loo shaqeeyaha hore u horgeliyay ee Xeerka HERO in la hawl geliyo.

# Hirgalin

## Sidee loo hirgeliyaa Xeerka NY HERO?

- Waxa loo baahan yahay in loo hirgaliyo iyada sharciga hoos timaad o ayaa ku xiran haddii ay jirto iyo in kale u aqoonsi hadda ah oo acudurka faafa ee hawada raacaa inuu yahay khatar daran oo caafimaadka halis u ah.
- U aqoonisiga waxa sameeya Guddoomiyaha Caafimaadka ee Gobolka New York.
- Si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyay, ka eeg dol.ny.gov/ny-hero-act



### Mar kasta (haddii u aqoonsi hirgashan yahay iyo in kaleba)

**Loo-shaqeeyayaashu waa inay:**

- Sameeyaan qorshe kahortaga soo-gaarista cudurrada faafa ee hawadu qaado.
- Shaqaalaha sii nuqul 30 maalmood gudahood ka dib marka la sameeyo.
- Shaqaalaha cusub ee la shaqaalaysiiyo sii nuqul kasta oo cusub marka la shaqaaleysiiyo
- Goob kasta ee shaqada ku dhaji qorshaha si shaqaaluhu u arkaan.
- Cusbooneysii qorshaha marka loo baahdo.

**Guddiyada Shaqaalaha**

- Loo-shaqeeyayaasha ay u shaqeyso 10 ama in ka badan waa inay u oggolaadaan shaqaalaha inay dejiyaan oo maamulaan guddiga badbaadada goobta shaqada ee maamulka shaqada.
- Guddiyada shaqaaluhu waxay wax ka qaban karaan sharci kasta ee ku saabsan caafimaadka iyo amniga goobta shaqada, kaliya maahan arrimaha khuseeya xanuunka COVID-19.
- Guddiyada shaqaalaha mar walba ayaa la samayn karaa oo la kulmi kara haddii magacaabista shaqaynayso iyo in kale.

### Marku u aqoonsigu hirgashan yahay

**Loo-shaqeeyayaashu waa inay:**

- Hubi in qorshahooda ka-hortagga u feydmiddu uu kii ugu dambeeyay yahay, oo aad raacdaan hagidda ka soo jeedda Waaxda Caafimaadka ee Gobolka New York iyo Waaxda Shaqada iyo shaqaalaha.
- Higalinta qorshaha.
- Sii shaqaalaha qorshaha oo kooban oo la hadal ah.

**Xuquuqda Shaqaalaha**

- Haddii loo-shaqeeyahaagu aanu u hoggaansamin heerarka uu dejiyey Xeerka HERO, waxay ku xad-gudbinayaan xuquuqdaada sida uu dhigayo xeerka NY HERO waxayna ku gelinayaan khatarta ah inaad la kulanto cudurrada faafa ee hawada la isu soo gudbiyo.
- Waxaad xaq u leedahay inaad diido shaqada aargudasho la'aan.
- Waxaad ashtako u gudbin kartaa Waaxda Shaqada: dol.ny.gov/ny-hero-act



# Guddiyada Shaqaalaha

## Waa maxay Guddiyada Shaqaaluhu?

Xeerka NY HERO ayaa siinaya shaqaalaha meheradaha gaarka loo leeyahay (ka shaqeeya shirkadaha leh 10 ama in ka badan oo shaqaale) xaqa ay ku samaystaan guddiyo shaqaale swax ka qabta arrimo kasta oo ku saabsan caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, ma aha uun kaliya arrimaha khuseeya COVID-19.



### Maxaa loo sameeyay guddi?

Samaynta guddi ayaa waxay shaqaaluhu u samayn kartaa meel ay ku sameeyaan kuwa soo socda:

- Inay soo sheegaan welwelka iyo cabashooyinka ku aadan loo-shaqeeyayaasha kuwaas oo loo-shaqeeyayaashu ay waajib ku tahay inay soo ka jawaabaan
- In dib u eegis lagu sameeyo sharci kasta oo caafimaad iyo badbaado oo ka timaada loo shaqeeyaha
- Inay ka qaybqaataan booqashooyinka goobta iyo kormeerka hay'adaha dawladda
- In dib u eegis lagu sameeyo warbixinnada kasta oo caafimaad iyo badbaado oo ay soo gudbiyaan loo shaqeeyaha
- Guddiyadu waxay kulmaan 2 saacadood rubac kasta inta lagu jiro saacadaha shaqada
- Xubnaha guddiga waxaa loo ogol yahay inay ka soo qaybgalaan tabbabar, aan ka badnayn afar saacadood, oo ku saabsan caafimaadka iyo badbaadada shaqada iyo shaqada guddiyada badbaadada shaqaalaha

### Yaa ka mid noqon kara guddiga?

- Guddigu waa inay ahaadaan ugu yaraan 2/3 shaqaale aan kormeerayn waana inay ku jiraan ugu yaraan hal wakiil oo loo shaqeeyaha ka socda. Guddiga waxaa guddoon-hoosaad ka ah loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha.
- Hadda Guddiga NY HERO (GEESIGA NY) ayaan yeelan karin xubnoka badan 12.
- Shaqaaluhu ayaa doorta inay soo xushaan wakiiladooda waxaanna ka dhowrsan in laga aargudsado





### Maxay yihiin xuquuqdeydu?

- Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay sameystan guddiyadan iyadoo aan shaqada laga joojin, hoos loo dhigin, ama nooc kasta oo aargoosi ah
- Waxaad ashtako u gudbin kartaa Waaxda Shaqada: dol.ny.gov/ny-hero-act
- Waxaad la xiriiri kartaa Isbaheysiga Shaqaalaha Muhiimka (Essential Worker's Coalition) si aad taageero u hesho! Iimayl: protectnyheroes@gmail.com

# Qorshaha Ka Hortagga Cudurrada Caabuqa Hawada

## Waa maxay Qorshaha Ka Hortagga soo Gaarista?



- Waaxda Shaqaaluhu waxay samaysay qorshe caadi ah oo wax laga beddeli karo ama loo qaadan karo sida ay tahay. Ujeedada qorshahan waa in shaqaalaha laga ilaaliyo inuu cudurka soo gaaro iyo cudurrada inta lagu jiro dillaaca cudurrada caabuqa hawada.
- Loo-shaqeeyayaashu waa inay ugu yaraan qaataan tilmaamahan soo socda.
- Qorshaha iyo tilmaamaha meheradaha wax soo-saarka gaarka u ah ayaa laga heli karaa barta DOL: dol.ny.gov/ny-hero-act

### Xakamaynta Ugu Yar Inta-lagu-jiro Dillaaca

Xakamaynta ugu yar ee soo socda waa in ay loo-shaqeeyayaasha u isticmaalaan dhammaan qaybaha goobta shaqada

- Wacyigelinta Guud
  - Joogtaynta masaafo kala fogaansho jireed
  - Xiro maaskaro gacmo gashi, iyo qalabka aaladaha badbaadinta shaqsiga (PPE)
  - Si fiican oo sax ah gacmaha u dhaq oo marar badan dhaq
- Haddii shaqaale lagu arko calaamadaha cudurka, markaa shaqaaluhu waa inuusan joogin goobta shaqada
- Shaqaaluhu waa in baaritaan caafimaad uu maraa marka la gaaro bilowga xilliga shaqada
- Waa in ay jiraan tillaabooyin sax ah ee masaafo kala fogaansho jireed la sameeyaa
- Shaqaaluhu waa inay dhowraan nadaafadda gacmo dhaqista oo sax ah
- Nadiifinta iyo caabuq-ka baabi'inta
- Isku hagaajin gaar ah loogu talagalaa shakhsiyaadka qaba qataro caafimaad daro oo dheeri ah

### Xakamaynta Hore Inta-lagu-jiro Dillaaca


Xakamaynta dheeriga ah ayaa la qaadi karaa marka xakamaynta ugu yar aysan shaqaalaha siin doonin ilaalin ku filan:

- Loo-shaqeeyayaashu waa inay ka fekiraan in la joojiyo howlaha halista ee ku meel gaarka
- Loo-shaqeeyayaashu waa inay ku fekiraan kuwan soo socda:
  - Hawo bixiye caadi ah
  - Hawo Sifeeye
  - Muraayada (Plexiglass)
  - Nidaamyada jeermiska ku dila iftiinka ee altarafaaylot
- Xakamaynta Maaraynta
  - Kordhinta masaafo kala fogaansho jireed
  - Shaqaalaha sii biriirif gaagaaban oo dheeri ah oo loogu talagalay dhaqidda gacmaha iyo nadiifinta
  - Shaqaalaha sii saabuun, nadiifiye, tuwaalada jeermiska ee la tuuro
- PPE ga waa in la siiyaa shaqaalaha iyadoo wax lacag ah aan shaqaalaha lagu dalacayn. PPE ga la bixiyay waxay ku salaysnaan doontaa qiimaynta halista ee goobta shaqada.

# Qorshaha Ka Hortagga Cudurrada Caabuqa Hawada

## Tabbabarka iyo Macluumaadka Inta-lagu-jio Dillaaca

- Loo shaqeeyuhu wuxuu hadal ahaan uu shaqaalaha ood han ku wargelin doonaa jiritaanka iyo goobta qorshaha la dejiyay, duruufaha lagu hawlgeliyay, sharciyada, iyo xuquuqdooda hoos yimaada Xeerka HERO.
- Marka qorshaha la hawlgeliyo, shaqaalaha oo dhan waxay heli doonaan tabbabar kaas oo dabooli doona dhammaan qaybaha qorshaha iyo mawduucyada kale ee la xiriira:
  - Waxa faafa iyo cudurrada uu keeni karo
  - Calaamadaha iyo ifafaalooyinka hore ee cudurka.
  - Sida cudurka loo kala qaadi karo
  - Sharaxaada Qorshahan Ka Hortagga Soo-gaarista
  - Isticmaalka iyo xaddidnaanta kontaroolada soo-gaarista
  - Howlaha iyo goobaha shaqada ee laga yaabo inay ku lug yeeshaan la kulanka cudurka faafa
- Tabbabarku wuxuu noqon doonaa:
  - Waxaa shaqaalaha la siinayaa si lacag la'aan waxayna dhacdaa saacadaha shaqada
  - Shaqaalaha loogu soo qor heer ku habboon qoraallada nuxurka iyo erayada ilaa heerkooda waxbarasho gaarsiisan, aqoontooda, iyo luqadda ay doortaan
  - Hadal ahaan loogu sheego ama dhinaca telefoonka loogu sheego, ama loogu sheego qaab elektaroonig, ama qaab kale



## Caabuq baabi'in

- Walxaha ay dad badan taabtaan waa in si joogta ah loogu nadiifiyaa jeermis-dile habboon.
- Shaqaalaha nadaafinta ayaa dhici karta inay ku jiraan khatar sii kordheysa sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay nadiifiyaan meelo badan oo wasakhaysan. Sababtaas awgeed, habab kale iyo/ama heerarka ilaalinta oo kordhay ayaa loo baahan karaa.
  - Halkii ay ka ahaan la'hayd buus ka tirista, waaxda CDC waxay ku talinaysaa in lagu nadiifiyo sagxadaha saabuun iyo biyo ka hor intaanay jeermiska dilin.
- Shaqaalaha gurigu waa inay xirtaan difaaca neefsiga.
- Waa in la isticmaalaa mashiinnada dahaarka ee waan in lagu dhex isticmaalo weelasha qashinka.
  - Si xoog ah ha uga soo saarin hawada bacaha qashinka ka hor inta aanad xirin


## Ilaalinta Aargoosiga

- Loo-shaqeeyaga waa inuusan shaqaalaha takoorin, u hanjabin, ka aargoosan, ama qaadi karin tallaabo lid ku ah shaqaale kasta si uu u isticmaalo xuquuqdiisa hoos yimaada qorshahan.
- Qorshaha waa in lagu daraa, in loo-shaqeeyayaashu waa inay ku daraan macluumaadka xiriirka si ay uga warbixiyaan xadgudubyada.
- Shaqaaluhu xadgudubyada ku soo gudbin karaa qaab af ama qoraal ah. Haddii aad la kulanto aargoosi, waxaad la xiriiri kartaa qofka loo xilsaaray ee loo-shaqeeyahaagu uu qoondeeyay.

# Macluumaad loogu talagalay Milkiilayaasha Ganacsiga Yaryar

## Maxay tani aniga iiga dhigan tahay milkiile ganacsi yar ahaan?

- Haddii aad tahay milkiilaha meherad yar oo aadan ahayn shaqaale keligiis ah, markaa waa inaad u hoggaansantaa xeerka Hero.
- Dhammaan loo-shaqeeyayaashu waa inay dejiyaan qorshahooda goobta shaqada iyagoo qaadanaya Heerarka Qaabka Waaxda Shaqada ay dejisay ama sameeyaan qorshe kaas ka adag. Qaababka waxaa laga heli karaa at dol.ny.gov/ny-hero-act.
- Haddii adiga aad samaysato qorshe kuu gaar ah, maaha in ay ogolaato DOL laakiin waa in ay buuxisaa shuruudaha qorshaha caadiga ah ee DOL.




## Maxaa dhacaya haddii aanan u hoggaansamin xeerka?

- Waxa laga yaabaa in lagugu ganaaxo $50 maalintiiba ama in ka badan haddii aad ka gaabiso inaad qaadato qorshaha ka hortagga u feydmidda ama inaad aad aqoonsato guddi shaqaale.
- Waxaa laga yaabaa inaad lagu soo rogo ganaax u dhexeeya $1,000 ilaa $10,000 Guddoomiyaha Caafimaadka ee gobolka, iyada oo ay u badan tahay inay kordhiso ganaaxyada haddii xadgudubyada soo noqnoqda ay dhacaan lix sano gudahood.
  - Waa in aad si degdeg ah u samaysaa oo aad u qaybisaa qorshe ka hortag ah oo aad la socotaa calaamadaha dillaaca cudurka hawad.

## Yaan la xiriiri karaa si aan luuqadeyda la igu caawiyo?

- Waaxda Shaqaaluhu waxay bixisaa adeegyo luqadeed si aad qof kula hadasho luqadda aad ku qanacsan tahay: 1-888-469-7356.

## Liiska Hubinta Fulinta

- [x] Samee qorshe loogu talagalay ka ilaalinta shaqaalaha cuduruada hawada raaca. Waxa kale kale waliba qaadan naqashadaha ay bixiso Waaxda Shaqada iyo shaqaaluhu.
- [x] Marka Gobolka New York uu u aqoonsado cudurka faafa ee hawadu raaca ee khatarta caafimaad ee halista leh, qorshahan waa in la fuliyo oo lala socodsiiyaa shaqaalaha. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay ku weyddiistaan luqaddooda ay doorbidaan.
- [x] Loo-shaqeeyayaasha ay u shaqeyso 10+ waa inay u oggolaadaan shaqaalaha inay dejiyaan oo maamulaan guddiga badbaadada goobta shaqada ee maamulka shaqada.

## Maxay yihiin heerka aan u baahanahay si aan u fuliyo?

- Qorshayaasha qaabka ee ay bixiso DOL waxay kuu fidinnaysaa macluumaad dheeraad ah laakiin ugu yaraan waa inaad:
  - Shaqaalaha sii maaskaro ay xirtaan oo shaqaalaha ku qasab inay maaskaro ay xirtaan.
  - Sii PPE daruuriga ah
  - Uga baaho kala fogaanshaha in ugu yaraan 6 dhudhun la kala fogaado
  - Shaqada dhaxdeeda ka samee goobo gacmaha lagu nadiifiyo/dhaqashada
  - Samee baaritaan maalinle ah bilawga maalin kasta si loo hubiyo in shaqaaluhu aanay qabin calaamadaha Covid-19
  - Kor u qaad sahayda wareegga hawada ka baxsan oo gee heerka ugu sarreeya ee suurtogalka ah
  - Si joogto ah jeermiska uga dil sagxadaha aadka loo taabto
  - Shaqaalaha cudurka qaba iyo kuwa ay dhici karto inuu gaaray uga baaho inay qaataan fasax karantiil oo lacag ah
  - Horjooge u magacaw inuu mas'uul ka noqo u hoggaansanaanta